HELSE BERGEN
Haukeland Universitetssykehus

Su'aalaha ku saabsan diiwaangelinta Diiwaanka Cudurka Sokorowga Norway ee dadka waaweyn

Ujeedada diiwaanka
Diiwaanka Cudurka Sokorowga/Macaanka Norway ee dadka waaweyn waa diiwaanka tayada qaranka. Ujeedada, mida ugu horeysa oo ugu muhiimsan, waa in la kobciyo daaweynta dadka qaba cudurka sokorowga/macaanka. Diiwaanka wuxuu sidoo kale abuuri doonaa aasaas muhiim u ah cilmi baaris ku saabsan sonkorowga iyo jirooyinka la xiriira cudurka sokorowga. Iskadiiwaangelinta Diiwaanka Cudurka Sonkorowga ee dadka waaweyn waa ikhtiyaari oo u baahan ogolaansho qoraal ah. Tani waxay ka dhigan tahay inaad saxiixdo caddaynta oggolaanshaha ka hor inta aynaan kaa diiwaangelinin diiwaanka.

Shirkadda caafimaadka ee *Helse Bergen HF*, Cusbitaalka Jaamacada Haukeland, waxay mas'uul ka yihiin falanqaynta xogta diiwaanka. Hawlgallada maalinlaha ah waxaa sameeya *Noklus* oo ku xiran Isbitaalka Diakonale Haraldsplass oo ku yaala Bergen. *Helse Bergen HF* ayaa mas'uul ka ah hubinta in macluumaadkaaga si sharciga waafaqsan loola tacaalo, sida waafaqsan Siyaasadda Asturida Macluumaadka ee Yurub (GDPR) iyo Sharciga Diiwaanka Caafimaadka (*helseregisterloven*).

Diiwaanka waxaa ku jiri doona macluumaadka soo socda ee adiga kugu saabsan:

- Macluumaadka guud: magaca, lambarka aqoonsiga shaqsiga, cinwaanka, jinsiga iyo magaca dhakhtarkaaga guud. Diiwaanka dadwaynaha ayaa loo isticmaali doonaa si loo hubiyo in macluumaadka shakhsiga uu sax yahay.
- Macluumaadka caafimaadka: nooca sonkorowga iyo sanadka la ogaadey cudurka, xubinnimada Ururka Sonkorowga, xaaladda ay soo sheegeen baaritaanada sanadlaha ah ee ay ku jiraan baaritaanada indhaha iyo / ama baaritaanada ay sameeyaan dhakhtarada waayeelka; aqoonta aad u leedahay cudurka sokorowga, dhibaatooyinka sonkorowga, dhererka iyo culeyska, natiijooyinka shaybaarka iyo isticmaalka daawooyinka loogu talagalay cudurka macaanka/sokorowga ama cudurada wadnaha.
- Macluumaadka ku saabsan xaaladaha iyo caqabadaha kala duwan ee la xiriira la noolaanshaha cudurka sokorowga.

Waxaa sidoo kale laga yaabaa in la tixgeliyo in lagaa codsado inaad bixiso muunado dhiig iyo kaadi ah oo siyaada ah, tusaale ahaan, markaad joogto baaritaanka dhakhtarka. Muunadahani waxaa lagu keydin doonaa meel loo yaqaano bangiga muunadaha kaas oo la xiriirta diiwaanka oo natiijooyinkana waxaa loo isticmaali doonaa kaliya cilmi baaris ku saabsan cudurka sokorta/diabeteska. *Helse Bergen HF* ayaa mas'uul ka ah bangigan muunadaha. Muunadahan ayaa kaliya la bixin doonaa haddii aad doorato inaad bixiso ogolaansho gaar u ah.

Macluumaadka waxaa si joogta ah u soo aruuriya dhakhtarkaaga guud asagoo macluumaadkaan ka soo qorto qoraaladaada caafimaadkaaga si loogu gudbiyo diiwaanka cudurka sonkorowga Norway ee dadka waaweyn ama adiga oo si toos ah u siinaya xarunta diiwaanka. Macluumaadka waxaa lagu wareejinayaa qalabka teknoolajiyada xogta, taas oo macnaheedu tahay in xogta la ammaan geliyey oo aan heli karin dadka aan khuseyn.

Ubarbar dhigida xogta ilaha kale
Si loogu isticmaalo mashaariicda cilmi-baarista ee kala duwan, ama si loo xaqiijiyo in macluumaadka ku qoran diiwaanka cudurka sonkorowga uu dhammaystiranyahay oo uu sax yahay, waxaa laga yaabaa inay macquul noqoto in diiwanka dadwaynaha laga soo saaro macluumaad la xiriira cudurka sonkorowga. Markasta oo aan ku xireyno diiwaanada kale, waxaa jiri doonta fariin ku saabsan oo aan kasii deyn doono boggayaga internetka (www.noklus.no). Diiwaanada laga yaabo inaan ka soo qaadno macluumaadka, waa Diiwaanka Cudurka Sonkorowga ee Carruurta (*Barnediabetesregisteret*), Diiwaanka Daawada (*Reseptregisteret*), Diiwaanka Kalyaha (*Nyreregisteret*), Diiwaanka Cudurada Wadnaha (*Register over*

hjerte- og karsykdommer), Diiwaanka Caafimaadka ee Dhalashada (*Medisinsk fødselsregister*), Diiwaanka Kansarka (*Kreftregisteret*), Diiwaanka Sababaha Dhimashada (*Dødsårsaksregisteret*), Diiwaanka Waxbarashada (*Utdanningsregisteret*), Diiwaanka Fasaxyada Jirada (*Sykefraværregisteret*) iyo Diiwaanka Bukaanada Norway (*Norsk pasientregister*) (waxaa ku jira macluumaad ku saabsan dhammaan bukaanada la dhigo isbitaalada ama lagu daaweeyo xarumaha caafimaadka ee dhakhaatiirta / khabiirada takhasuska leh).

Macluumaadka shakhsiyadeed looma isticmaali doono cilmi-baaris, marka laga reebo haddii daraasaddan ay horay u ansixisay Guddiyada Gobolka ee Cilmi-baarista Seyniska Caafimaadka, sarkaalka ilaalinta xogta hawlaha cilmi-baarista ama Hay'adda Badbaadada Macluumaadka ee Norway (*Datatilsynet*).

Macluumaadka waa in la keydiyaa hadba inta ay lagama maarmaan tahay, si loo buuxiyo ujeeddada Diiwaanka Cudurka Sonkorowga Norway ee dadka waaweyn. Dhammaan xogta la uruuriyey waxaa loola dhaqmaa si qarsoodi ah, qof kasta oo ka shaqeeya xogta diiwaanka waxaa waajibaad ka saaran qarsoodiga xogta haddii ay dhacdo xaalado ay iyaga ka war hayaan. *Helse Bergen* (oo ah mas'uulka falaqeynta xogta) waxay hubin doontaa in xuquuqda asturnaanta mar kasta la ilaaliyo.

Xuquuqda helitaanka, beddelidda iyo tirtiridda xogta
Waxaad leedahay xuquuq buuxda oo aad ku heli karto macluumaadka adiga lagaa diiwaan geliyey. Haddii aad aaminsan tahay in macluumaadka adiga kugu saabsan uu khalad yahay, waxaa laga yaabaa in lagu weydiisto inaad saxdo. Waxaa intaa dheer, waxaad codsan kartaa in macluumaadka laga tirtiro diiwaanka iyo in muunad kasta oo dhiig iyo kaadi ah oo la burburiyo, iyada oo aan wax sabab ah la bixinin, marka laga reebo haddii aan xogta horayba loo gelinin falanqayn ama aan loo adeegsan daabacaad saynis. Dhakhtarkaagu wuu ka warqabaa arinkan oo ma saameyn doonto daaweynta aad hesho haddii aad doorato inaadan isdiiwaangalinin ama haddii aad rabto in aad ka baxdo.

Waxaad isticmaali kartaa xuquuqdaada adigoo la xiriiraya *Noklus*. Ka eeg sidoo kale macluumaadka xiriirka dhanka hoose.

Bixinta macluumaadka laga helo diiwaanka waxaa kaliya ay dhici doontaa marka ay waafaqsan tahay ujeedada diiwaanka. Magacyada iyo lambarrada waxaa lagu badalayaa fure marka macluumaadka la sii daaynaayo.

Macluumaadka xiriirka
Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Diiwaanka Cudurka Sonkorowga Norway ee dadka waaweyn adigoo wacaya: *Noklus*, tel. 55 97 95 00. Waxaad sidoo kale macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan diiwaanka ka heli kartaa www.noklus.no.

Shirkadda caafimaadka ee *Helse Bergen HF* ayaa magacowday sarkaal ilaaliya xogta kaas oo ka caawinaya xaqiijinta in macluumaadka shakhsiga si sharci ah loo hirgeliyo iyo in xuquuqda aad u leedahay ilaalinta xogtaada shakhsi ahaaneed la joogteeyo. Waxaad la xiriiri kartaa sarkaalka xog ilaalinta haddii aad qabto su'aalo guud oo ku saabsan xuquuqda aad u leedahay ilaalinta macluumaadkaaga shakhsiyeed adiga oo wacaya taleefanka 55975558, ama u diraya e-mail: personvernombudet@helse-bergen.no.

Haddii aad aaminsan tahay in xuquuqda ilaalinta macluumaadkaaga shakhsi ahaaneed la jabiyey, waxaad xaq u leedahay inaad la xiriirto Hay'adda Xog Ilaalinta ee Noorway.

HELSE BERGEN
Haukeland Universitetssykehus

CADEYNTA OGGOLAANSHAHA

Waxaan akhristay warqadda macluumaadka ku saabsan Diiwaanka Cudurka Sokorowga Norway ee dadka waaweyn oo waxaa la ogeysiiyey xaqiiqda ah in ay jirto xarunta diiwaangelinta cudurka sokorowga ee dadka waaweyn ee *Noklus* oo ku taala Bergen. *Helse Bergen HF*, Cusbitaalka Jaamacada Haukeland ayaa mas'uul ka ah falanqaynta xogta waxayna leedahay diiwaanka.

Warqada macluumaadka, waxaan sidoo kale ka fahmey ujeedada diiwaanka, macluumaadka shakhsiyeed ee la diiwaan geliyo, halka macluumaadka laga keeni doono, sida macluumaadka loo bixin doono iyo xuquuqda aan u leeyahay marka la eego helitaanka, beddelaadda iyo tirtirida macluumaadkayga ee lagu kaydiyey diiwaanka.

Waxaan ogsoonahay in diiwaangelintu ay ka kooban tahay buuxinta foomka cudurka sonkorowga, oo laga yaabo in la i weydiiyo in aan bixiyo muunadaha dhiigga iyo kaadida oo lagu kaydin doono bangiga muunadaha ee cilmi baarista, oo qayb ka ah diiwaanka. Muunadaha ku jira biobank (bangiga muunadaha) waxaa kaliya loo isticmaali doonaa cilmi-baarista cudurka sonkorowga.

Waxaan halkan ka oggolaanayaa in macluumaadka ku saabsan jirradayda iyo natiijooyinka baaritaannada dhiigga iyo kaadida la galiyo Diiwaanka Cudurka Sonkorowga Norway ee dadka waaweyn, iyo in diiwaanka ay iigala soo xiriiri karaan wixii cilmi-baaris ah oo la xiriira cudurka sonkorowga.

Magaca: .....
(Isticmaal xarfaha waaweyn)

Lambarka aqoonsiga shakhsiyeed .....
(11 lambar)

Goobta: ..... Taariikhda: .....

.....
Saxeexa bukaanka

.....
Saxeexa ehelka/wakiilka (haddii bukaanka aanu awoodin inuu bixiyo oggolaansho)

Oggolaanshaha waxaa loo geyn karaa dhakhtarka ama waxaa si toos ah loogu diri karaa:

Diiwaanka Cudurka Sonkorowga Norway ee dadka waaweyn
Noklus
Boks 6165
5892 Bergen